



# Tusmada Ogolaanshaha Guud ee Ganacsiga: Tubta lagu raacaayo Sharciga

Ganacsiyada samaynaaya shaqooyinka la xariira warshadaha waa inay ku dhaqmaan sharciyada Federaalka, Gobalka, iyo Ismaamulka ee difaacaaya caafimaadka bulshooyinkeena ayagoo ka hortagaaya wasaqaynta biyaha. **Gobalka California** ayaa shaqooyinkan ku sharciyeeya **Ogolaanshaha Guud ee Warshadaha (IGP)**, kaasoo Laanta Biyaha ee San Diego ay fuliso. Ismaamulka San Diego ayaa abuuray tusmo, ay ku jiraan talaabooyinka iyo lifaaqyada webseedyada, si looga taageero ganacsiyada ku dhaqanka IGP ga Gobalka California.



Wasaqda biyaha ayaa ka imaan kara ilo kaladuwan, ayna ku jiraan qashinka aan la xakamayn, qashinka wax soo saarka, daadka goobaha beeraha soo mara, iyo wasaqda gaariyaasha laga dhaqo. **Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka tahay inay ka baqaan goobtaada; keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka.** Dhaqan gelinta Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka ayaa ka hortagaaya in wasaqdu gasho marinadeena biyaha nagana caawinaysa in ganacsigaagu ku dhaqmo labadaba xeerarka IGP ee Gobalka California iyo kuwa kale ee maxaliga ah.



## TALAABADA 1 AAD GO'AAMI IN GANACSIGAAGU KU DHAQMAAYO SHURUUDAHA IGP:

▶ **Raadi koodhkaaga SIC: koodhkaaga SIC (Nooca Caadiga ah ee Warshada) ayaa ku salaysan shaqada rasmiga ah ee ganacsigaaga.**

- Adeegso aalada lagu raadsho SIC kadibna ku raadi shaqada eray bixin gaar ah (tusaale, khamri, dhagax jarid, shaqada working) birta) qaybta "Geli raadinta eray Bixinnada". Qaybaha muhiimka ah ee noocyada ganacsiga ayaa laga heli karaa [Liiskan Koodhka SIC](#).

▶ **U fiiri koodhkaaga SIC Lifaaqa A ee IGP si aad u fiiriso haddii shaqada aasaasiga ah ee ganacsigaaga la sheegay.**

- IGP ga ayaa maamula noocyada kaladuwan ee shaqooyinka, ayna ku jiraan qaar kamid ah oo aan badanaa loo aqoonsanayn "warshado."
- Tusaaleyaasha shaqooyinka ganacsiga ee la maamulo (iyo koodhadhkooda SIC) waxaa ku jira wax soo saarka (SIC yada 2000-3999), mashiinnada iyo shaqada biraha (3300-3799), dhagax jarida (3281), khamro samaynta (2084), baraha quudinta qaar (0211-0272), iyo adeegyada gaadiidka ee leh dayactirka ama dhaqida gaariyaasha (4000-4220, 4226-4599).

▶ **Haddii aadan hubin koodhka SIC ama haddii ganacsigaagu u baahanyahay ku dhaqanka shuruudaha IGP, la xariir Laanta Biyaha ee San Diego oo aad ka wacayso (619) 516-1990 ama [r9\\_stormwater@waterboards.ca.gov](mailto:r9_stormwater@waterboards.ca.gov)**

▶ **Haddii la go'aansho in ganacsigaagu uusan ku dhaqmayn IGP ga, halkaan ku jooji. Haddii kale, u gudub Talaabada 2 aad.**

### Nidaamka Raadinta Qaybta Caadiga ah ee Warshada (SIC)

TIRO KOOBKA IYO XOGTA | TUSMADA SIC

Boggaan wuxuu u sahlaysaa isticmaalaha inuu raadsho nooca 1987 ee buugga tusmada SIC asagoo adeegsanaaya eray bixin, si uu u helo xogta qeexaysa

Geli KOODHKA SIC:

Geli raadinta eray Bixinnada:

Dir

Tir

raadi Caawimaad iyo Tusaaleyaal



## TALAABADA 2 AAD DIR CODSIGAAGA IGP GA:

- ▶ **Go'aami haddii aad u baahan tahay inaad gubiso Shahaadada Wasaq La'aanta (NEC) ama codsiga Ogeysiiska Ujeedada (NOI).**
  - **NEC:** Waxaad u qalantaa inaad dirto **NEC** haddii **UUSAN** jirin wasaq banaanka uga baxda oo la xariirta shaqada warshada, agabka, iyo wasaqda (tusaale, INAYSAN jirin wax biyaha daadka ah oo meesha mara 100%. NEC ayaa leh shuruudaha yar, ee qiimaha jaban ee sanadlaha ah iyo qarashka sanadkii la qaado marka loo eego NOI.
  - **NOI:** Haddii uu jiro **WAX** shaqooyinka warshada, agabka, ama qashinka ah oo banaanka u baxa, markaas waa inaad soo dirtaa **NOI**. La xariir Laanta Biyaha ee San Diego si aad u xaqiijiso nooca codsiga ku habboon ganacsigaaga.
- ▶ Booqo [smarts.waterboards.ca.gov](https://smarts.waterboards.ca.gov) (SMARTS) si aad u abuurto ciwaan aadna u dirto codsigaaga.



## TALAABADA 3 AAD DHAQAN GELI SHURUUDAHA IGP:

- ▶ **La qabso IGP ga si loo fahmo shuruudaheeda.**
  - Soo gudbinta warbixinta IGP ayaa bilaabanaysa Luuliyo 1 waxayna dhammaanaysaa Juun 30.
- ▶ **Si aad u dhamaystirto shuruudaha NEC:**
  - Akhri [galka guud ee ogolaanshaha](#) iyo [waraaqda xogta ee NEC](#) (Shahaadada Xakamaynta Wasaqda) kadibna diyaarso qariirada goobta.
  - Sanad kasta qarashka sii Gobalka, dib u qiimee goobtaada, oo dib u sharciyee NEC.
- ▶ **Si aad u dhamaystirto shuruudaha NOI:**
  - Diyaari oo hayso [Qorshaha Kahortaga Wasaqaynta Biyaha Daadka \(SWPPP\)](#).
    - [SWPPP yada](#) waxaa ku jira xog ku saabsan shaqooyinka ganacsiga iyo sifooyinka, ayna ku jiraan agabka wasaqda keeni kara iyo shaqooyinka kahortaga wasaqda, korjoogtaynta joogtada ah iyo tababarka biyaha roobka, iyo qariirada goobta.
  - Samee kormeerka bil kasta ee goobta iyo kormeerka sanadlaha ah ee balaaran ee goobta.
  - [Sanballo kasoo qaad](#) biyaha roobka ee socda ee maraaya goobaha ku habboon ee biyuhu ka baxaan.
    - Soo qaado agabka oo aqoonso cabirada loo baahan yahay si sanbal loo qaado (adoo ku salaynaaya [shaqooyinkaaga ganacsiga](#), goobta uu ku yaalo, iyo shuruudaha kale ee ruqsada) kadibna la xariir [shaybaar ruqsad u haysta](#).
    - [Sanbal qaadista](#) ayaa loo baahan yahay afar jeer sanad warbixineed kasta (Luuliyo 1 ilaa Juun 30). Qaad labo sanbal inta u dhexaysa Luuliyo 1 - Diseembar 31 haddana qaad labo sanbal oo kale inta u dhexaysa Janaayo 1 - Juun 30 inta lagu jiro saacadaha caadiga ah ee shaqada iyo xaalado gaar ah.
    - Natiiyooyinka sanbalka waa in la gashaa laguna xaqiijiyaa ciwaankaaga SMARTS 30 maalmood gudahood kadib marka la keenay.
    - High Heerarka sareeya ee wasaqda ayaa keeni kara in ganacsigaagu dhaqan gasho talaabooyin dheeraad ah, sida inuu la tashto [Khabiir Ruqsad ku haysta Biyaha Daadka mara Warshadaha iyo in la dhiso nidamayada daawaynta biyaha roobka](#).
  - Sanad kasta u dir qarashaadka gobalka oo dir warbixinta sanadlaha ah ee SMARTS bisha Luuliyo 15keeda.



**Ogoow in IGP mudadiiba mar wax laga badelo, isbadellada dhawaan la sameeyayna ay badeli karaan shuruudaha qabanaaya xaruntaada.**

Si aad u hesho xog iyo khayraad dheeraad ah, fadlan booqo webseedka Gudiga Maamulka Khayraadka Biyaha ee Gobalka: [https://www.waterboards.ca.gov/water\\_issues/programs/stormwater/industrial.html](https://www.waterboards.ca.gov/water_issues/programs/stormwater/industrial.html)

! Si aad u hesho nuqulka casriga ah ee buuggaan xogta iyo lifaaqyada (qoraalka hoosta ka xariiqan) ee ku jira, booqo bogga isha Ganacsiga iyo Warshadaha ee Ismaamulka: <https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/dpw/watersheds/IndustrialCommercial.html>